

Tallada la cusbooneysiyeey ee COVID-19

[NSW Health](#) waxay soo saareen tallo COVID-19 oo cusub oo loogu talagalay dugsiyada 14kii Ogoosto 2020. Tani waxay bedelaysaa sida dugsiyadeenu u shaqeeyaan.

1. Carruurta jiran ee qaba astaamaha hargabka u le'eg xitaa haddii ay jiyiin astaamo fudud, waa inay guriga joogaan. Carruurta ku xannuunsaday dugsiyada waxaa lagu heyn doonaa goobta carruurta xannuunsata waxaana loo diyaarinayaa in la qaado iyaga.
 - Caafimaadka NSW wuxuu ka codsaday dugsiyadu inay ku dhiirigeliyaan cid kasta oo jiran ama leh astaamo fudud oo hargabka oo kale ah, inay ballansadaan in lagu baaro dhakhtarkooda xaafada ama mid ka mid ah rugaha caafimaadka [COVID-19 clinics](#).
 - Shaqaalaha iyo ardeyda qabta astaamaha hargabka oo kale ah waxay u baahan doonaan inay keenaan nuqulka baaritaanka COVID-19 inaysan qabin xannuunka ka hor intaan loo ogolaan inay dugsiyada ku soo noqdaan.
2. Meeshii suurtagal ah, ardeydu waxay la joogi doonaan kooxdooda (tusaale, fasalka, sannadka, kooxda, ama heerka) dhammaan nashaadkooda waxbarasho ee dugsiyada dhexdiisa si loo xaddido xiriirka usu dhow.
3. Booqashooyinka aan muhiimka ahayn ee dugsiyada lama ogola. Haddii aad dooneysid inaad la hadashid macalim ama xubin shaqaalaha dugsiyada ka mid ah, waa inaad dugsiyada soo wacdaa oo aad ballan sameysataa. Ballantu waxay noqoneysaa midkood taleefan ama fiidiyow kuwada hadal.
4. Nashaadka dugsiyada dhexdooda ah waa inuu ku ekaadaa isla bulshada xaafada ama soonaha. Nashaadka la mid ka ah iyo bandhigyada cayaaraha leh isu imaatin fara badan meeshay ku lug leeyihiin laba dugsi wax ka badan lama ogola.
5. Dhammaan kooxda heesta (choirs) iyo/ama nashaadka kale ee heesaha, iyo sidoo kale isticmaalka qalabka dabeysha koox ahaan, lama ogola. nidaam khaas ayey leeyihiin ardeyda Shahaadada Dugsiyada Sare (HSC).
6. Ardeyda Year 11 iyo Year 12 ee dhammeynaya maadooyinka (HSC) waxaa laga yaabaa inay sii wadaan imaatinka fasalada/nashaadka la xiriira maadooyinka laga helayo kambasyada kale oo kaliya. Dhammaan ardeyda kale oo ay ku jiraan ardeyda Year 11 ee aan dhammeynaynin maadooyinka HSC ma aha inay yimaadaan kambasyada kale inta ka hartay Term 3. TAFE iyo barnaamijyada kale ee VET ka waxaa laga yaabaa inay sii socdaan.

In kastoo wacyigelinta kindhada ee 2021 ay baaqi ku ahaaneyso hakintaas, waxaa jira soojeedino caawimaad badan oo laga helayo [department's website](#). Soo jeedinahaan waxay ka dhigi doonaan kuwo farxad leh oo hawgelinaya ugudubkooda kindhada.

Ballan la sameyso dugsiyada si aad u hesho wax badan oo ku saabsan isbedelada.

Adeega Turjubaanka Taleefanka

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah fadlan wac maamulaha dugsiyada. Haddii aad u baahan tahay turjumaan kaa caawiya weydiintaada fadlan ka wac Adeega Turjubaanka Taleefanka 131 450 oo weydiiso turjubaan luuqadaada ah. Adeegani wuxuu noqon doonaa mid bilaash kuu ah adiga.